

Adeegsiga Google Classroom Arday Ahaan

Google Classroom malaha daaqad Waalid ama gelitaanka Waalidka, si ay waalidku u arkaan macluumaadka Google Classroom waa inay ardayga la joogaan marka uu galayo. Wuxuu aad raacdaa tilmaamahan si uu ardaygu u galo oo uu markaa u dhax tibaaxo.

Table of Contents

1. Ku Biirida Fasalka ee Ardayga.....	3
Sida loogu biiro fasalka	3
Miyaad ilawdo ama kaa lumay koodhkii fasalku? Koodhka ayaa shaqayn waayay miyaa?	3
Ku biirida fasalka	3
Waxa aad ku biirtaa fasal leh koodh	3
Aqbal casuumada macalinku uu soo diray.....	4
2. Eeg Macluumaadka Fasalkaaga.....	4
3. Eeg Laylisyadaada Fasalka.....	5
Waxa aad eegtaa laylisyada soo socda	5
Waxa aad dhamaan layliskaaga ka aragtaa fasalka	5
Waxaad u kala saataa fasalada.....	6
Waxa aad eegtaa laylisyada iyo bayaanada ugu danbeeyay	7
Waxa aad arkaysaa layliska oo mawduuc loo kala saaray	7
4. Waxa aad Eeg Taariikhaha Ay ku Eeg Yihiiin iyo Munaasabahaha Taariikhahooda.....	7
Maxaad taariikhda kasta ku samaynaysaa?	7
Eeg shayada ku jira taariikhdaada	8
Waxa aad eegtaa taariikhdaay ay ku eeg yihiiin ee ku yaal taariikhda Classroom	8
Eeg taariikhda uu ku eeg yahay iyo dhacdooyinka ku jira Taariikhda Google kaaga	9
Ku darso waxyaabao Taariikhda Google.....	10
Waxa aad ku darsataa xasuusinta shakhsii ahaaneed	10
Ku dar dhacdo.....	10
5. Gudbinta Layliska.....	11
Gudbinta layliska	11
Gudbinta layliska kadiska ah.....	13
Waxa aad ku gudbisaa layliska doc-ga laguugu diray	13
Waxaa lagu calaamadinaya la dhameeyay	13
Layliska aan la gudbin	14
Sax habsan ah ama laylis maqan.....	14
6. Kaga Shaqaynta Doc-ga Layliska Laguugu Diray.....	15

Waxa aad ku shaqaysaa waraaqahaaga shakhsii ahaaneed.....	15
Masax waraaqahaaga oo markaa nuqlu cusub samee.....	15
7. Eegitaanka Dhibcahaaga Guud ee Fasalka.....	16
Dooro ikhtiyaar aad ku arki karto dhibcahaaga	16
Waxa aad ka aragtaa dhibcahaaga boga Fasalada	16
Waxa aad ka eegtaa dhibcahaaga boga Classwork	17
Waxa aad ka eegtaa dhibcahaaga boga Baahinta Tooska ah	18
8. Iisticmaal Xisaabta Gmail ee Ardaygaaga.....	19
limeel u dir macalinkaaga	19
limeel u dir macalinka.....	19
Eeg iimeel.....	19
9. Gmail Cheat Sheet.....	20

1. Ku Biirida Fasalka ee Ardayga

Si aad u isticmaasho Classroom, waa inaad ka gashaa kombuyutarkaaga oo aad markaa ku biirtaa fasalo. Kadibna, waxa uu kuu soo diraya macalinkaaga layiska oo waxa aad la xidhiidhi kartaa ardayda aad isku fasalka tiiin. Marka aad kaga biirto fasal hal aalada, waxa aad ka wada geli karaan aaladaha oo dhan.

Sida loogu biiro fasalka

Waxa jira 2 dariiqo oo aad ugu biiri karto fasal:

- Waxaa ad ugu biirtaa fasal adiga oo isticmaalaya koodhka fasalka—Hadii uu ardaygaagu uu kusijo koodhka fasalka, isticmaal koodhkan oo waxa aad isku dartaa fasalka. Macalinkaagu waxa uu kusiin karaa koodh inta aad fasalka ku jirto ama iimeel ayuu kuugu soo diraya.
- Waxa aad aqbashaa casuumada macalinkaaga—Hadii uu macalinkaagu uu kuusoo diray casuumada, waxaad arko doontaa Ku Biir kaadhka fasalka oo markaa ku taala boga hore ee Classroom.

Miyaad ilawdo ama kaa lumay koodhkii fasalku? Koodhka ayaa shaqayn waayay miyaa?

Hadii aad masaxdo, waydo, ama aad ilawdo koodhka fasalka kahor inta aanad ku biirin fasalka, waxa aad ka dalbataa macalinka inuu dib kuugu soo diro koodhka ama inuu mid cusub kuu sameeyo. Hadii uu kuu shaqayn waayo koodhku, macalinkaaga kaalmo ka dalbo.


Oggow: Kaliya adiga ayaa isticmaali kara koodhka fasalka marka aad ku biirto fasalka. Waxa aad kadibna ku biiraysaa fasalka, oo markaa lagaama doonayo inaad dib u isticmaasho koodhka.

Ku biirida fasalka


Waa inaad is duwaan gelisaa Classroom kahor inta aanad ku biirin fasalka. Miyaad ka shakiday inaad is duwaan gelisay? Wax badan ka oggow [sida la isku duwaan geliyo Classroom](#).

Waxa aad ku biirtaa fasal leh koodh

1. Qabo classroom.google.com.
2. Dusha, waxa aad riixdaa Add + ➤ Join class (Ku dar Ku biirida fasalka).




3. Geli koodhka fasalka ee macalinkaagu ku siiyay oo riix Join (Ku Biir). Koodhka fasalku waxa uu ka kooban yahay 6 ama 7 xaraf iyo lambar. Tusaale ahaan, hjhmgrk ama g5gdp1.



Aqbal casuumada macalinku uu soo diray

1. Qabo classroom.google.com.
2. Kaadhka fasalka, riix Join (Ku Biir).



2. Eeg Macluumaadka Fasalkaaga

Waxaad macluumaadka fasalka ka arkaysaa Boga Baahinta Tooska ah. Hadii uu macalinkaagu uu kusoo daro macluumaadka, waxa dhici karta inay ku jиро duruusta fasalka, lambarka qolka iyo sharaxaad.

Kombuyuutar

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix the class ➔ Stream (Baahinta Tooska ah ee fasalka).
3. Dusha sare, sawirka hoostiisa, riix Falaadha hoos u jeeda ▾.
4. (Ikhiyaar) Si aad u xidho macluumaadka fasalka, riix Falaadha kor u jeeda ⏵.

3. Eeg Laylisyadaada Fasalka


Waxa jira dhawr qaab oo aad u naqdin karto layliskaaga fasalka:

- Waxaad ka arko kartaa laylisyada soo socda boga Fasalada
- Waxa aad ka eegtaa layliskaaga fasalka boga dhamaan Laylisyadaada
- Waxaad layliskaaga u kala saartaa fasal ee Qaypta Wuxuu La Samaynayo ee boga ku taala
- Waxaad ka eegtaa laylisyada ugu danbeeya boga Baahinta Tooska ah
- Waxa aad ke eegtaa layliskaaga oo mawduucyo loo kala saaray boga Classwork (Layliska Fasalka)

Waxa aad eegtaa laylisyada soo socda

Boga Fasalada, kaadhka fasalka, waxa aad ka arkaysaa layliska todobaad kadib ah. Waxa aad arkaysaa cinwaanka iyo taariikhda uu ku eeg yahay ilaa 3 shay.


1. Qabo classroom.google.com.
2. (Ikhtiyaar) Si aad macluumaadka u aragto, riix cinwaanka shaqada.




Waxa aad dhamaan layliskaaga ka aragtaa fasalka

Waxa aad ka arki kartaa dhamaan laylisyadaada boga Layliskaaga. Waxa aad ka eegi kartaa dhibcahaaga, waxaad naqdin kartaa layliska iyo taariikhda ay ku eeg yihiin, oo waxa aad arki karaa wixii laylis ah ee aad la daahday ama maqan. Waxa aad sidoo kale u kala saari kartaa xaalada layliska: La Bixiyay, Lasoo celiyay inta la saxay, ama Maqan. Hadii aad doonayso, waxaad ka arki kartaa macluumaad dheeraad ah, sida faalooyin ama lifaaqyo.

1. Qabo classroom.google.com.
2. Dooro ikhtiyaar:
 - Kaadhka fasalka, riix Your work (Layliskaaga) .



- Riix class ➤ Classwork (Layliska Fasalka) ➤ View your work (Eeg layliskaaga).



3. (Ikhtiyaar) Si aad u aragto lifaaqa, faaloooyinka, ama macluumaadka dheeraadka ah ee layliska ama su'aalo, riix cinwaanka layliska ➤ View details (eeg macluumaadka).
4. (Ikhtiyaar) Si aad u kala saarto layliskaaga, taas oo Filterka hoos taala, riix Assigned (La Diray), Returned with grade (Lasoo celiyay inta la saxay), ama Missing (Maqan).


Waxaad u kala saataa fasalada

Boga dushiisa, waxa aad u kala saari kartaa fasalo, oo waxa aad arki kartaa layliska:

- Laga Shaqaynayo—Layliska la diray ama aan weli la dhamaynin. Wuxaan arki doontaa fasal iyo cinwaanka layliska oo markaa la iskugu keeney maqan, aan weli gaadhin wakhtigeedu, maanta ku eeg ama todobaad ku eeg, ama ka danbeeya.
- Dhamaaday—Laylisyada aad dhamaysay ee aad soo celisay. Waxa aad arkaysaa xaalada layliskaaga-lasoo celiyay ama hadhaw dhamee-oyo dhincaha hadii dhinco lasiiyay.

Si aad u aragto layliskaaga:

1. Qabo classroom.google.com.
2. Click Muujinta ≡ ➤ To-do (Laga Shaqaynayo).
3. (Ikhtiyaar) Si aad ugu kala saarto layliskaaga fasalo, riix All classes (Dhamaan fasalada) oo dooro fasal.



4. Riix cinwaanka.
5. (Ikhtiyaar) Si aad u aragto layliska aad hore u gudbisay, riix Done (La Dhameeyay) oo waxa aad doorataa cinwaanka si aad jawaabta u aragto.

Hadii layliskaaga dhibco la siiyay, dhibcuuhu way ku qoran yihiin.

Waxa aad eegtaa laylisyada iyo bayaanada ugu danbeeyay

Waxa aad ka arki kartaa laylisyada ugu danbeeyay iyo bayaanada boga Baahinta Tooska ah. Macluumaadka ugu danbeeyaa ee lasoo dhigay waxaa la dhigaa boga dushiisa.

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka.
3. (Ikhtiyaar) Si aad u aragto tilmaamaha ama jawaab celinta, riix layliska ama su'aasha.

Waxa aad arkaysaa layliska oo mawduuc loo kala saaray

Macalinkaagu waxa uu laylisyada u kala saari karaa mawcuudyo, sida layliska guriga ama qoraalo, ee boga Layliska fasalka.

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka.
3. Xaga sare, riix Classwork (Layliska Fasalka).
4. Xaga sare, waxa aad ka eegtaa Su'aalo ama Laylis .
5. (Ikhtiyaar) Si aad u aragto wixii tilmaamo ah ama jawaab celin ah, riix macluumaadka ➤ View assignment (Tus layliska) ama View question (Eeg su'aal).

4. Waxa aad Eeg Taariikhaha Ay ku Eeg Yihiiin iyo Munaasabadaha Taariikhahooda

Fasal kasta, waxa lagu wadagaa taariikhaha Classroom iyo Taariikhda Google oo macalinka iyo ardayda lala wadagaa. Hadii aanad wax taariikhda ah arag, maamulaha ayaa markaa taariikhda ka bakhtiiyay fasalkaaga.

Maxaad taariikhda kasta ku samaynaysaa?

Taariikhda Google	Taariikhda Classroom
<ul style="list-style-type: none">• Waxa aad eegtaa taariikhda layliska fasalku ku eeg tahay• Eeg dhacdooyinka fasalka• Waxa aad ku dartaa xasuuusinta shakhsi ahaaneed si aad kaliya adigu u aragto• Ku dar dhacdooyin, sida madasha wax akhriska	<ul style="list-style-type: none">• Eeg layliska fasalka taariikhaha ay ku eeg yihiiin• Riix shayga si aad ugu furto Classroom

Eeg shayada ku jira taariikhdaada


Waxa aad eegtaa taariikhda ay ku eeg yihin ee ku yaal taariikhda Classroom


Taariikhda Classroom, waxa aad ka arki kartaa taariikhaha ay ku eeg yihin laylisyada fasalku. Kuma dari kartid wax shayo ah.

1. Qabo classroom.google.com.
2. Xaga sare, waxa aad riixdaa Menu .



3. Riix Calendar (Taariikhda).




4. Dooro ikhiyaar:
- Si aad u aragto shaqooyinkii hore ama kuwa soo socda, waxaa taariikhda ku garab yaal oo aad riixdaa Back (Noqo) < ama Next (Xiga) .
- 
- Si aad u aragto dhamaan fasalada, riix All classes (Dhamaan fasalada).
- 
- Si aad u aragto layliska hal fasal, riix All classes (Dhamaan fasalada) > oo dooro fasalka.
5. (Ikhiyaar) Si aad u aragto layliska, riix layliska ama su'aal.


Eeg taariikhda uu ku eeg yahay iyo dhacdooyinka ku jira Taariikhda Google kaaga

Taariikhdaada Google, waxad aad ka arki kartaa taariikhdaa ay ku eeg yihiin laylisyadaada fasalka iyo dhacdooyinka fasalka, sida safarada ama imtixaanaadka. Liiska taariikhdaada kale , waxaad ka heleysaa dhamaan taariikhdaa fasaladaada, oo dooro si aad u aragto ama aad u qariso.

- Qabo classroom.google.com.
- Riix fasalka > Classwork (Layliska fasalka).
- Riix Google Calendar (Taariikhda Google) .



4. (Ikhtiyaar) Wixii faahfaahin ah, riix shayga.




5. (Ikhtiyaar) Si aad u aragto ama aad u qariso taariikhda fasalka, dhanka bixid, oo hoos timaada Taariikhda kale, sax sanduuqa fasalka.

Ku darso waxyabao Taariikhda Google

Waxa aad ku darsataa xasuusinta shakhsi ahaaneed

Waxa aad ku darsan kartaa xasuusinta shakhsi ahaaneed, sida qoraal ku xasuusiya kaalkuleetarkaaga. Wax kasta oo aad ku darsato Taariikhda Google kama soo bixi doonaan taariikhda Classroom.

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka > Classwork (Layliska fasalka).
3. Riix Google Calendar (Taariikhda Google) .




4. Wixii tilmaamo dheeraad ah, qabo [Add reminders \(Kudar xasuusin\)](#).

Ku dar dhacdo

Waxa aad ku dari kartaa dhacdooyin, sida madal wax akhris, iyo casuumada ardayda fasalka. Wax kasta oo aad ku darsato Taariikhda Google kama soo bixi doonaan taariikhda Classroom.

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka > Classwork (Layliska fasalka).

3. Riix Google Calendar (Taariikhda Google).



4. Wixii tilmaamo dheeraad ah, qabo [Create an event \(Abuur dhacdo\)](#).


5. Gudbinta Layliska

Iyada oo ku xidhan layliska, waxa aad ku soo gudbin kartaa layliska doc ee uu macalinkaagu kuu diray, waxa aad samayn kartaa Google Doc ama waxaad ku dari kartaa laylka layliska.

Hadii aad u baahan tahay inaad wax ka badasho layliskaaga aad gudbisay, waxa aad dooran kartaa ha gudbin layliska. Laakiin wixii laylis ah ee lasoo gudbiyo ama lagu calaamadiyo la dhameeyay wixii ka danbeeya taariikhda uu ku eeg yahay waxaa lagu qorayaa inuu habsan yahay.


Gudbinta layliska

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka ➤ Classwork (layliska fasalka) ➤ ee lagugu qoray.
3. Si aad ugu lifaaqdo:
 1. Layliskaaga Hoostii, riix Add or create (Ku dar ama samee) ➤ dooro Google Drive  , Link  , ama Faylka .




2. Dooro lifaaqa ama waxa aad gelisaa URL-ka linkiga oo riix Add. Note (Ku Dar Qoraal): Sidaada fayl uguma lifaaqi kartid.

4. Si aad ugu lifaaqdo doc cusub:
 1. Layliskaaga hoostiisa, riix Add or create (Ku dar ama samee) ➤ dooro Docs , Slides (bogaga) , Sheets (xaashiyaha) , ama Drawings (sawirka) . Fayl cusub ayaad lifaaq layliskaaga ku darta oo furmaya.



2. Riix faylka oo waxa aad gelisaa macluumaadka. Oggow: Wuxuu aad ku lifaaqi kartaa ama aad samayn kartaa wax ka badan hal fayl.
5. (Ikhtiyaar) Si aad lifaaqa uga saarto, waxaa magaca lifaaqa garabyaala, riix Remove (kasaarid).
6. (Ikhtiyaar) Si aad faalo gaar ah ugu raaciso macalinkaaga, qaybta Private comments (Falooinka gaarka ah), waxaad ku qortaa faaladaada oo riix Post (geli) .
7. Riix Turn In (Gudbi) oo xaqiji.

Xaalada layliskaaga waxaa loo badayaa Turned in (La gudbiyay).




Gudbinta layliska kadiska ah

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka ➔ Classwork (layliska fasalka) ➔ ee layliska.
3. Riix foomka oo waxa aad ka jawaabtaa su'aalaha.
4. Riix Submit (Gudbi) ➔ Ku calaamadi la dhameeyay oo xaqiji. Hadii foomka uu kaliya yahay ka layliska lagaga hsaqeeyo, xaalada layska waxaa loo badali doonaa Turned in (La gudbiyay).
5. (Ikhtiyaar) Hadii layliska wax ka hadhsan yihiin oo laga shaqayn doono, riix Open assignment (Fur layliska).

Waxa aad ku gudbisaa layliska doc-ga laguugu diray

Hadii uu macalinkaagu ku lifaaqo waraaqo ay ku jiraan magacaaga oo ciwaan u ah, markaa waxaa isla leh adiga oo markaa naqdinaya oo wax ka badali kara. Inta aad ka shaqaynayso, macalinkaaga ayaa markaa naqdinaya waxqabadkaaga kahor inta aanad riixin Turn in (Gudbi).

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka ➔ Classwork (Layliska fasalka) ➔ ee layliska.
3. Si aad u furto faylka laguu diray, riix suulka magacaagu ku qoran yahay.
4. Geli layliskaaga.
5. Dooro mid:
 - Waraaqaha, riix Turn in (Gudbi) oo xaqiji.
 - Classroom, layliska, riix Turn In (Gudbi) oo xaqiji.



Xaalada layliska waxaa loo badeley Turned in (la gudbiyay).

Waxaa lagu calaamadinaya la dhameeyay

Muhiim: Wixii laylis ah ee la gudbiyay ama lagu calaamadiyay la dhameeyay kadib taariikhda uu ku eekaa waxaa lagu qorayaa habsan, xataa hadii layliska la gudbiyay kahor inta aan la gaadhin taariikhda uu ku eekaa.


1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka ➔ Classwork (Layliska fasalka) ➔ ee layliska.
3. (Ikhtiyaar) Qaybta Private comments (Faalooyinka gaarka ah) hoosteed, waxa aad ku dartaa faalada macalinkaaga aad u dirayso oo riix Post (Soo dhig).
4. Riix Mark as done (Ku calaamadi la dhameeyay) oo xaqiji.

Xaalada layliska waxaa loo badalay Turned in (La gudbiyay).

Layliska aan la gudbin

Muhiim: Wixii laylis ah ee la gudbiyay ama lagu calaamadiyay la dhameeyay kadib marka la gudbiyay waxaa lagu qorayaa habsan, xataa hadii aad gudbisay wax ka horeeya taariikdha uu ku eeg yahay. Hadii aad gudbiso laylis, waxa aad xaqijiisaa inay tahay wakhtiga aad gudbinaysaa wax ka horeeya taariikhda ay ku eeg tahay.

1. Qabo classroom.google.com.
 2. Riix fasalka ➔ Classwork (Layliska fasalka) ➔ ee layliska.
 3. Riix Unsubmit (Lama gudbin) oo xaqiji.
- Oggow: Layliskan iminka lama gudbin. Gudbin kahor inta aan la gaadhin taariikhda ay ku eeg tahay.



Sax habsan ah ama laylis maqan

Macalinkaaga ayaa markaa dejinaya xeerka habsanka ee fasalka. Laakiin, Classroom ayaa kahortaga inaad soo gudbiso wakhti danbe layliska.

Marka uu macalinkaagu kugu qoro laylis, waxa aad ku calaamadiyaa Assigned (La diray). Hadii aanad wakhtigiisa kusoo gudbin layliskaaga, waxaa lagu calaamadiyay Missing (Maqan) ama Done late (Wakhti danbe) marka la gaadho taariikhda ay ku eeg tahay ama wakhtiga ay soo gaadho. Tusaale ahaan, hadii ay ku eekeyn 9:00 Subaxnimo, oo aad gudbiso 8:59 Subaxnimo. Laakiin hadii soo gudbiso 9:00 subaxnimo, waa habsan.

1. Qabo classroom.google.com.
2. Kaadhka fasalka, waxa aad riixdaa Your work (Layliskaaga) .
3. Dhanka midig, waxa aad arkaysaa xaalada shaqada ee shay kasta:
 - Lagu qoray—Layliska uu kugu qoray macalinkaagu. Sax taariikhda ay ku eeg tahay.
 - Turned in (La gudbiyay)—Layliskaaga waxaa gudbisay wakhtigiisa.
 - Graded (La saxay)—Wuu saxay layliska macalinku oo uu soo gudbiyay, waad arki kartaa dhibcahaaga.
 - Returned (Lasoo celiyay)—Wixii laylis aanu sixin macalinka ee uu soo celiyay, waad eegi kartaa ✓.
 - Missing (Maqan)—Maad soo gudbin layliska.
 - Turned in (La gudbiyay): Done late (La Dhameeyay mar danbe)—Layliska waxa aad soo gudbisay wakhti danbe.
4. (Ikhiyaar) Wixii macluumaad dheeraad ah, riix shayga si aad u balaadhisoo oo ➔ riix View details (eeg faahfaahinta).


6. Kaga Shaqaynta Doc-ga Layliska Laguugu Diray

Marka aad ku furayso layliska ama su'aasha Classroom, waxaa dhici karta inay ku lifaaqan yihii waraaqo magacaagu ku dul qoran yahay. Waxaa weeye nuqlu aad adigu iska leedahay oo laguugu soo lifaaqay. Waad kaga shaqayn kartaa oo waad gudbin kartaa layliskaaga.

Hadii aad doonayso inaad dib u bilawdo, waxa aad ka saari kartaa gudbinta, waxaad abuuri kartaa nuqlu layliskaaga oo dib ayaad u gudbin kartaa. Marka aad gudbiso layliskaaga, macalinkaaga ayaa arkaya waraaqaha oo ay ku qoran tahay macagaagu.

Waxa aad ku shaqaysaa waraaqahaaga shakhsii ahaaneed

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka oo kadibka dooro ikhtiyaarka:
 - Riix layliska ama su'aalaha.
 - Riix View all (Eeg dhamaan) ➤ ee layliska ama su'aasha, riix View details (Eeg faahfaahinta).
3. Si aad u furto waraaqaha, Your work (Layliskaaga)hoostii, riix suulka.
4. Kaga shaqee waraaqahaaga.
5. (Ikhtiyaar) Si aad u gudbiso layliskaaga, riix Turn In (Gudbi) oo xaqiji.




Masax waraaqahaaga oo markaa nuqlu cusub samee

Hadii aad doonayso inaad nuqlu kaga shaqayso waraaqahaaga shakhsii ahaaneed, waxa aad ka saari kartaa nuqlukii hore oo waxa aad samayn kartaa nuqlu cusub. Hadii aad gudbiso layliskaaga, waa in aad marka hore ka noqotaa gudbinta. Waa inaad xaqijisaa inaad dib u gudbin layliskaaga inta aan la gaadhin taariikhda uu ku eeg yahay.

Si aad waraaqahaaga shakhsii ahaaneed uga saartid gudbinta:

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka oo kadibna dooro ikhtiyaarka:
 - Riix layliska ama su'aasha.
 - Riix View all (Eeg dhamaan) ➤ oo layliska ah ama su'aasha, riix View details (eeg faahfaahinta).

3. Layiskaaga hoostii, riix Unsubmit (Ka noqo gudbinta) oo xaqiji.




Oggow: Marka aad ka noqoto gudbinta, waxa aad ku sii wadi kartaa shaqada nuqlkaaga doc. Si aad dib ugu bilawdo nuqlkaa cusub, waxa aad sii wadaa masixida.

4. Magaca waraaqaha agtooda, riix Remove (masax) .

Waraaqahaaga waxaa laga saaray waxa aad gudbinayso.

Si aad u samayso nuql waraaqaha shakhsii ahaaneed:

1. Riix Make A Copy (Nuqlul Ka Samee).



2. (Ikhtiyaar) Si aad u gudbiso layiskaaga, riix Turn In (Gudbi) oo xaqiji.

Waxa aad ku lifaaqi kartaa faylka layiskaaga kahor inta aanad gudbin. Wixii tilmaamo dheeraad ah, qabo [Turn in \(Gudbi\) layiska](#).

7. Eegitaanka Dhibcahaaga Guud ee Fasalka


Hadii uu macalinkaagu soo dhigo dhibcahaaga guud ahaan, waxa aad ka arko kartaa boga Your work (Layiskaaga). Dhamaan macalimiintu masoo dhigaan dhibcaha guud, markaa waxaa dhici karta in aanad arag.

Dooroo ikhtiyaar aad ku arki karto dhibcahaaga


Waxa aad ka aragtaa dhibcahaaga boga Fasalada

1. Qabo classroom.google.com.

2. Kaadhkaaga fasalka, riix Your Work (Layliskaaga) .




3. (Ikhtiyaar) Wixii maclumaadka dhibcaha ah, riix dhibcaha.




Oggow: Hadii aanad arag dhibco, macalinkaaga ayaan markaa soo gelin dhincaha guud Classroom. Waxa aad waydiin kartaa macalinkaaga maclumaadka ku saabsan dhibcahaaga.

Waxa aad ka eegtaa dhibcahaaga boga Classwork

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka > Classwork (Layliska Fasalka).
3. Riix View your work (Layliskaaga eeg).




4. (Ikhtiyaar) Wixii macluumaadka dhibcaha ah, riix dhibcaha.




Oggow:Hadii aanad arag dhibco, macalinkaaga muusoo dhigin dhibcaha guud Classroom. Waxa aad waydiin kartaa macalinkaaga macluumaadka ku saabsan dhibcahaaga.

Waxa aad ka eegtaa dhibcaha boga Baahinta Tooska ah

1. Qabo classroom.google.com.
2. Riix fasalka ➔ View all (Eeg dhamaan).



3. (Ikhtiyaar) Wixii macluumaadka dhibcaha ah, riix dhibcaha.



Oggow:Hadii aanad arag dhibcaha, macalinkaagu muu soo dhigin dhibcaha guud Classroom. Waxa aad waydiin kartaa macalinkaaga macluumaadka ku saabsan dhibcahaaga.

8. Isticmaal Xisaabta Gmail ee Ardaygaaga


limeel u dir macalinkaaga

Waxa aad iimeel uga dhax diri kartaa macalinkaaga Classroom. Si aad u dirto iimeel:


- Isticmaal xisaabta dugsiga. Xisaabtan waxaa sidoo kale loo yaqaan G Suite ee xisaabta Waxbarashada.
- Maamuluhu waa inuu dugsiga ka shidaa iimeelka. Classroom, boga Dadka, hadii aanad ku arag limeel ku xiga magaca, maamulka ayaa bakhtiyay iimeelka.

limeel u dir macalinka

1. Qabo classroom.google.com.
2. Dooro fasalka macalinka aad doonayso inaad iimeelka u dirto.
3. Riix People (Dadka).



4. Magaca macalinka agtiisa, waxaa riixdaa Email. Oggow: Hadii aanad arag ilmeel, waxaa dhici karta inaad isticmaalayo xisaabta shakhsii ahaaneed ama uu maamulku bakhtiyay iimeelka.




5. limeelka cusub, waxa aad ku qortaa fariintaada ➔ riix Send (Dir).

Eeg iimeel

Kama dhax arki kartid ama laguuguma soo diri karo iimeelo Classroom dhaxdiisa. Si aad u dirto ama aad u hesho iimeel, isticmaal G Suite ee Gmail-ka Waxbarashada


1. Qabo classroom.google.com.
2. Qaybta sare ee midix, waxa aad riixdaa App Launcher ➔ Gmail .




9. Gmail Cheat Sheet

 *Waxa aad samaysataa oo aad dirtaa iimeel, ka jawaabtaa iimeelada, oo aad habaysataa sanduuqaaga.*

1. Riix Compose (Qor) si aad fariim iimeel ah u qorto



2. Riix fariin ku jirta sanduuqaada si aad u akhrido oo aad uga jawaabto.



3. Habayso sanduuqaaga.

